

# Hagayaalka NDIS – waa talo ku socota waalidiinta iyo daryeelayaasha

## NDIS Navigators – advice for parents and carers

Somali | Soomaali

**Waaxda Waxbarashada waxaa ka go'an inay taageerto carruurta naafada ah iyo qoysaskooda. Taasi waa sababta aan u soo bandhigeyno Qorshaha Caymiska Naafada Qaranka (National Disability Insurance Scheme - NDIS) Hagayaalka dhammaan dugsiyada gaarka ah ee dawladda Victoria.**

Hageyaalka NDIS ayaa kaa caawin kara:

- inaad dhix socoto oo aad fahamto NDIS
- inaad codsato oo aad u hesho ilmahaaga taageerooyinka ay maalgeliso NDIS
- inaad fahantid hawlahaa sida dib u qiimaynta qorshaha.
- inaad ogaatid sida la isula soo qaado arrimaha ku saabsan qorshaha ilmahaaga ama bixiyaha.

Hagaha NDIS ma:

- la xidhiidhi doonaan NDIS-ka ama daaweyayaasha (therapists) ay NDIS maalgeliso, ama buuxin doonaan codsiyada iyo waraaqaha ayagoo adiga ku matalayo, laakiin waxay kaa caawin karaan inaad adiga waxyaalahan samaysato
- ma bixin doono maamul kiis arday oo gaar ah ama maaraynta dhibaatooyinka
- kuma talin doono mana kuu gudbin doono adeeg bixiye gaar ah oo NDIS ta.

## Goorma ayaa hagayaalka NDIS laga heli karaa dugsigayga?

Hagayaalka NDIS waxay ka howlgelli doonaan qaar ka mid ah dugsiyada gaarka ah ee dawladda Victoria sanadka 2023, iyada oo dugsiyo badan ay yeelan doonaan hagayaalka NDIS sanadka 2024.

Dugi kasta oo takhasus leh oo dawladda Victoria ah wuxuu yeelan doonaa Hagaha NDIS marka la gaaro 2025.

Dugsigaaga ayaa kuu sheegi doona marka Hagaha NDIS la heli karo.

## Hagaha NDIS yuu u shaqeeyaa?

Hagaha NDIS ka wuxuu u shaqeeyaa kana shaqeeya dugsiga.

Uma shaqeeyaan Hay'adda Caymiska Naafada Qaranka ama hay'ad ay maalgeliso NDIS.

## **Sideen ula hadli karaa Hagaha NDIS ta?**

Marka uu dugsigaagu yeesho Hagaha NDIS waxay ku siin doonaan maclummaad ku saabsan sida loola xidhiidho.

Hagaha NDIS-ta waxa la heli karaa oo keliya inta lagu jiro xilliyada dugsiga. Wuxuu laga yaabaa inay kuula kulmaan shaqsi ahaan, online ka ama ay kugula hadlaan taleefanka.

## **Ma lacag baa markaad rabto inaad la hadashid Hagaha NDIS?**

Maya, wax lacag ah lagama bixinayo adeegyada Hagaha NDIS-ta ee aad helayso.

## **Ma inaan talo ka helo baa Hagaha NDIS?**

Adeegyada Hagaha NDIS gabii ahaanba waa ikhtiyaari.

Uma baahnid inaad la hadasho Hagaha NDIS si aad ugu hesho taageero ilmahaaga ka socda NDIS-ka ama dugsigaaga.

## **Sidee ku helaa maclummaad dheeraad ah?**

Wixii maclummaad dheeraad ah oo ku saabsan hagaha NDIS, la xidhiidh dugsigaaga.